# Xoojinta Ka-Qaybgalka Muwaadiniinta iyo Isla-Xisaabtanka ee Dowladda Hoose ee Waqooyiga Gaalkacyo: Caqabadaha, Fursadaha, iyo Mudnaanta Siyaasadeed

Farxaan Isxaaq Yuusuf

Faalo kooban 47 | Julaay 2026

## Soo koobid

- Dakhliga dowladda hoose ee Waqooyiga Gaalkacyo isbeddel ayaa ku yimid sanadihii u dambeeyay, iyadoo hadda dakhliga billaha ah uu u dhexeeyo $84,000 ilaa $90,000, oo ka yimaada ilaha dakhli ee shaqeeya. Duqa degmada ayaa muujiyay rajo ah in dakhligaasi uu gaari karo $300,000 bishii haddii la howlgeliyo ilaha dakhli ee hadda aan shaqeynayn.
- Dowladda hoose ee Waqooyiga Gaalkacyo waxay ku shaqaysaa miisaaniyad sanadle ah oo qiyaastii dhan 1 milyan oo doolar, taas oo u muuqata mid aan ku filnayn daboolidda kharashaadka maamulka iyo bixinta adeegyada aasaasiga ah.
- Muwaadiniintu waxay walaac ka muujiyeen maqnaanshaha iyo/ama xaaladda liida ay ku sugan yihiin nalalka waddooyinka iyo adeegyada uruurinta qashinka oo aan ku filnayn. Waxay ku boorriyeen maamulka degmada in uu wax ka qabto arrimahan muddada dheer soo jiray, oo ay mudnaan gaar ah siiyaan.
- Duqa degmada ayaa soo bandhigay caqabado dhowr ah oo xaddidaya awoodda maamulka ee ah inuu si buuxda u guto waajibaadkiisa, kuwaas oo ay ka mid yihiin colaadaha soo noqnoqda ee beelaha, kaabayaasha waddooyinka oo liita, iyo biyo-roobaadka joogtada ah ee fadhiista waddooyinka degmada.

### Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

### Ku saabsan qoraaga

**Farxaan Isxaaq Yuusuf** waa Agaasime Ku-xigeenka Fulinta iyo Agaasimaha Cilmi-baarista ee SPA.

**www.somalipublicagenda.org**

**© 2026 Somali Public Agenda**

## Hordhac

Waqooyiga Gaalkacyo waxay ka mid ahayd degmooyinka ee ugu horreeyay ee ay Puntland ka dhistay gole deegaan sannadkii 2005. Sida ku cad Xeerka Dowladda Hoose Lr. 7, waxaa loo aqoonsaday degmo darajada A oo leh gole deegaan ka kooban 33 xubnood. Goleyaasha degmooyinka Puntland, oo ay ku jirto Waqooyiga Gaalkacyo, ayaa inta badan lagu soo dhisay doorashooyin dadban oo ku salaysan habka beelaha, iyadoo la raacayo qaab-dhismeedkan sharciyeed ilaa sanadkii 2023, markaas oo Waqooyiga Gaalkacyo, oo ay weheliyaan 33 degmo oo kale, ay gole deegaan ku doorteen doorasho toos ah.

Inkastoo Waqooyiga Gaalkacyo ay leedahay gole deegaan, duq magaalo, iyo ku-xigeen oo si toos ah loo doortay, haddana waxay weli wajahaysaa caqabado badan oo dhanka maamulka ah, kuwaas oo lagu sheegay daraasad ay Somali Public Agenda sameeysay oo cinwaankeedu yahay '[U daadejinta cashuur uruurinta iyo adeegyada bulshada dowladaha hoose ee Puntland, Galmudug, iyo Banaadir]'. Caqabadahan oo ay ka mid yihiin kalsooni yari iyo sharciyad xaddidan, hufnaanta iyo isla xisaabtanka oo aan aheyn mid ku filan, iyo ka-qaybgalka muwaadiniinta ee go'aan-qaadashada heer degmo oo hooseeya. Dhamaan caqabadahaani waxa ay weli caqabad ku yihiin awoodda dowladda hoose ee gudashada waajibaadkeeda si wax-ku-ool ah.

Iyadoo arrintaan laga duulayo, Somali Public Agenda (SPA), waxa ay Waqooyiga Galkacyo ku qabatay kulan furan 12-kii May 2026, kaas oo la isugu keenay maamulka dowladda hoose iyo muwaadiniinta si ay uga wada hadlaan arrimaha muhiimka ah ee degmada. Kulankan wuxuu ahaa kii afaraad oo ka mid ahaa afar kulan dadweyne oo la qorsheeyay in lagu qabto Galmudug iyo Puntland (Dhuusamareeb, Koonfurta Gaalkacyo, Waqooyiga Gaalkacyo, & Qardho).

Doodahaan ayay ujeeddadoodu tahay xoojinta ka qeybgalka muwaadiniinta ee maamulka dowladda hoose maadaama ay xaddidan tahay fursadaha ay muwaadiniintu si toos ah ula falgeli karaan hay'adaha dowladda. Waxa kale oo ujeedka doodaani tahay in la kordhiyo wacyiga bulshada ee ku saabsan doorka iyo mas'uuliyadaha dowladaha hoose, iyadoo la dhiirrigelinayo hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo wada-shaqayn wax-ku-ool ah oo u dhexeysa maamulada dowlada hoose iyo bulshada degmada.

Faalladan kooban waxay diiradda saareysaa kulankii Waqooyiga Gaalkacyo oo ay ka qeyb galeen 50 qof (15 haween ah, iyo 35 rag ah) oo kala matalayay qeybaha kala duwan ee bulshada, oo ay ka mid yihiin haweenka, dhallinyarada, odayaasha dhaqanka, hoggaamiyeyaasha bulshada, aqoonyahannada, culimada diinta, iyo hoggaamiyeyaasha ururrada dhallinyarada. Sidoo kale, waxaa kulanka ka qybgalay Duqa Waqooyiga Galkacyo, Xuseen Cabdinuur Maxamed.

Kulanka ayaa socday ku dhawaad saacad iyo bar, waana la duubay. Muuqaalka waxaa laga heli karaa barta YouTube ka ee SPA. Kulanka ayaa intii uu socday waxay ka qeybgalayaashu ka hadleen arrimo kala duwan oo ay ka mid yihiin uruurinta dakhliga, bixinta adeegayda, biyo-fariisiga roobka, nalalka waddooyinka, hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo xiriirka ka dhexeeya maamulka dowladda hoose iyo muwaadiniinta.

Faalladan kooban waxay soo koobaysaa arrimaha ugu muhiimsan ee looga hadlay kulanka iyo jawaabihii uu ka bixiyey duqa magaalada. Waxayna bixinaysaa talooyin tixgelin mudan kuwaas oo lagu xoojinayo maamulka degmada, gaar ahaan dhinacyada hufnaanta, iyo ka-qaybgalka muwaadiniinta ee Waqooyiga Gaalkacyo.

## Uruurinta Dakhliga Dowladda Hoose

Si lamid ah saddexda degmo ee kale ee ay Somali Public Agenda ku qabatay kulamada dadweynaha, ka qeybgalayaashu waxay soo bandhigeen su'aalo dhowr ah oo ku saabsan uruurinta dakhliga degmada, kuwaas oo ay ka mid yihiin ilaha dakhliga ee degmada, dakhliga billaha ah, iyo guud ahaan maareynta dakhliga dowladda hoose.

Duqa degmada ayaa sharaxay in dowladda hoose ay hadda ku tiirsan tahay dhowr ilo dakhli oo shaqeeya, kuwaas oo ay ka mid yihiin canshuuraha kastamyada, canshuurta wada marista, rukhsadaha ganacsiga, iyo oggolaanshaha dhismaha. Si kastaba ha ahaatee, wuxuu xusay in ilo dakhli oo muhiim ah, gaar ahaan canshuurta guryaha iyo canshuurta ganacsiyada, ay weli yihiin kuwo aan shaqaynayn.

Sida uu sheegay duqa degmada, dowladda hoose hadda waxay ka heshaa ilaha dakhli ee shaqeeya lacag u dhexeysa $84,000 ilaa $90,000 bishii. Sidoo kale, waxa uu sheegay in dakhliga bishii aanu is beddelin sanadihii la soo dhaafay, asiga oo xaaladdan ku sababeeyay colaadaha soo noqnoqda ee beelaha ee ka dhaca gudaha iyo hareeraha degmada, iyo sidoo kale caqabadaha dowladda hoose ka heysta dhinaca awoodda hay'adeed.

Duqa degmada ayaa sidoo kale xusay in dhowr degmo oo ka mid ah dowladaha hoose ee Puntland ay howlgeliyeen ilo dakhli oo ka ballaaran kuwa Waqooyiga Gaalkacyo, taasina ay keentay inay helaan dakhli ka sarreeya kan degmada Gaalkacyo.

Inkasta oo ay jiraan caqabadahan, dhanka kale, duqa degmada wuxuu muujiyay rajo ah in dakhliga billaha ah ee degmada uu kor ugu kici karo qiyaastii $300,000 haddii si buuxda loo howlgaliyo ilaha dakhliga ee hadda aan shaqayn. Ka qeybgalayaashu waxay si la mid ah ku doodeen in uruurinta dakhliga kor loo qaadi karo haddii muwaadiniintu arkaan horumar muuqda oo laga sameeyay adeegyada dadweynaha iyo isla xisaabtan lagu sameeyo dakhliga hadda la uruurinayo.

Canshuurta guryaha, oo ka mid ah ilaha dakhliga ee ugu muhiimsan degmada, ayaa weli ah kuwa aan shaqayn, inkastoo ay jiraan qiyaastii 40,000 ilaa 50,000 guri oo qaar badan oo ka mid ah horey loo diiwaangeliyay, loo sameeyay lambarro aqoonsi, iyadoo la adeegsanayo GPS, si loo fududeeyo uruurinta dakhliga.

Duqa degmada ayaa dib-u-dhaca ku yimid hirgelinta canshuurta guryaha u sababeeyay karaan yarida dhinaca hay'adaha dowladda hoose, isaga oo qiray in bulshada degmada guud ahaan ay si wanaagsan uga wada shaqeeyeen arrimaha canshuuraha. Wuxuu sidoo kale tilmaamay in maamulku qorsheynayo inuu howlgaliyo ilahan dakhli, inkasta oo uusan sheegin wakhti cayiman oo lagu fulinayo.

Ka qeybgalayaashu waxa ay sidoo kale duqa degmada weydiiyeen cidda diyaarisa iyo cidda ansixisa miisaaniyadda sanadlaha ah ee dowladda hoose iyo in muwaadiniintu door ku leeyihiin dajinta iyo diyaarinta miisaaniyadda.

Duqa degmada oo ka jawaabaya ayaa sheegay in dowladda hoose ay leedahay miisaaniyad sanadle ah oo qiyaastii dhan $1 milyan, taasoo ay ansixiyaan golaha degmada. Sikastaba ha ahaatee, duqa degmada wuxuu qiray in muwaadiniintu aysan si toos ah uga qeybqaadan diyaarinta ama ansixinta miisaaniyadda, isaga oo sheegay in golaha degmada ay metelaan dadka degmada.

Caqabadani kuma koobna oo keliya Waqooyiga Gaalkacyo. Guud ahaan Soomaaliya, ka-qeybgalka muwaadiniinta ee miisaaniyad-sameynta ayaa ah mid kooban, haddii ay noqon laheed heer degmo, heer dowlad-goboleed ama heer dowlad dhexe. Inta badan meelaha ay ka dhacaan la-tashiyada dadweynaha ee arimaha miisaaniyada ayaa ah kuwa aan laga run sheegin, haddii ay jirtaanna waa kuwo loogu talagalay in lagu buuxiyo shuruudaha deeq-bixiyeyaasha halkii ay aheyd in si dhab ah ugu loogu daro mudnaanta iyo baahiyaha muwaadiniinta go'aamada la xiriira miisaaniyad-sameynta.

Intaa waxaa dheer, marka miisaaniyadaha la ansixiyo, lagama dhigo mid ay si fudud dadweynuhu u heli karaan. Tanina waxa ay xaddidaysaa in ay muwaadiniintu ogaadaan sida loo qoondeeyay kharashaadka dadweynaha, waxa ayna hoos u dhigeeysaa awoodda ay kula xisaabtami karaan mas'uuliyiinta dowladda. Sidaas darteed, hagaajinta hufnaanta miisaaniyadda iyo abuuridda jawi ay muwaadiniintu kaga qeybqaataan sameeynta miisaaniyadda, waxa ay muhiim u tahay xoojinta iyo kor-u-qaadista kalsoonida u dhexeysa bulshada iyo dowladda hoose.

## Kharashaadka

Arrinta labaad ee lagu falanqeeyay doodda dadweyne waxay ahayd kharashaadka dowladda hoose. Si la mid ah dooddii dakhliga, ka qeybgalayaashu waxay daneynayeen inay fahmaan sida loo loo kharash-gareeyo miisaaniyadda sanadlaha ah ee dowladda hoose oo qiyaastii dhan $1 milyan.

Duqa degmada oo ka jawaabaya ayaa sharaxay in qeyb weyn oo ka mid ah miisaaniyadda kooban ee dowladda hoose lagu bixiyo mushaarka shaqaalaha iyo howlaha la xiriira amniga. Wuxuu xusay in amniga oo keliya ay ku baxdo qiyaas dhan 20 ilaa 30 boqolkiiba miisaaniyadda sanadlaha ah.

Sida uu sheegay duqa degmada, dowladda hoose waxa ay kharash badan ku bixisaa arrimaha la xiriira wax-ka-qabashada colaadaha soo noqnoqda ee beelaha ee ka dhaca gudaha iyo hareeraha degmada. Kharashaadkan waxaa loo bixiyaa si loogu fududeeyo isu keenidda odayaasha labada dhinac ee uu ka dhexeeyo khilaafka, hoygii la dejin lahaa inta ay socdaan dadaallada dhexdhexaadinta, iyo dirista ciidamo booliis ah si ay u taageeraan howlaha nabadaynta.

Sidoo kale waxa uu sharaxay in dowladda hoose ee Waqooyiga Gaalkacyo ay si joogto ah uga qeyb qaadato dhexdhexaadinta iyo kala-dhex-gelidda colaadaha beelaha ee mararka qaar ka dhaca meel ka baxsan degmada, kuwaas oo ay ku jiraan qeybo kale oo ka tirsan waqooyiga gobolka Mudug, inkastoo amniga uu yahay mas'uuliyad ay leeyahay dowlad gobaleedka Puntland.

Duqa degmada ayaa ku dooday in arrimaha amniga ay culays dhaqaale oo weyn ku yihiin dowladda hoose, islamarkaana mas'uuliyiinta ka mashquuliyaan waajibaadkooda aasaasiga ah. Kharashaadkii loo adeegsan lahaa bixinta adeegyada dadweynaha iyo horumarinta degmada ayaa loo isticmaalaa wax-ka-qabashada amni darrada iyo dhexdhexaadinta khilaafaadka maxalliga ah.

Xaaladdan waxa ay la mid tahay natiijooyinkii hore oo laga helay degmooyinka kale ee ay SPA ku qabatay doodaha dadweyne. Mas'uuliyiinta dowladaha hoose waxay si joogto ah u muujiyeen culayska dhaqaale iyo maamul ee ka dhasha wax-ka-qabashada amni darrada iyo colaadaha beelaha, iyaga oo tilmaamay in xalka arimahaan ay u isticmaalaan kharashaadka yar ee ay helaan, isla markaana culeeskaani waxa uu yareeynayaa awooddooda wax ka qabashada adeegyada aasaasiga u ah dadweynaha.

Inkasta oo uu duqa degmada bixiyay dulmar guud oo ku saabsan mudnaanta kharashaadka, haddana ma uusan soo bandhigin faahfaahin cad oo ku saabsan sida miisaaniyadda inteeda kale loo isticmaalo. Si la mid ah miisaaniyadda degmada, xogta kharashaadka baxay looma heli karo si furan oo dadweynuhu arki karaan, taas oo xaddidaysa awoodda muwaadiniinta ee ay ku kormeeri karaan kharashaadka dadweynaha islamarkaana kula xisaabtami karaan dowladda hoose.

## Bixinta Adeegyada iyo Baahinta Daadejinta Awoodaha

Si lamid ah degmooyin badan oo ku yaalla Soomaaliya, dowladda hoose ee Waqooyiga Gaalkacyo waxay bixisaa adeegyo dadweyne oo kooban, taas oo ay sabab u tahay in awoodda maaliyadeed iyo howlaha bixinta adeegyada ay weli ay ku xiran yihiin maamulka heer dowlad goboleed ee Puntland. Tusaale ahaan, qeybaha muhiimka ah, sida waxbarashada iyo caafimaadka, ayaa weli waxaa gacanta ku haya dowlad-gobaleedka Puntland, iyadoo ay jiraan calaamado muujinaya in mas'uuliyadahaas loo wareejin doono dowladaha hoose mustaqbalka dhow. Sidaas darteed, maamullada degmooyinku waxay weli ku shaqeeyaan awood iyo kharashaad kooban, taas oo caqabad ku ah awoodda ay ku gudan karaan waajibaadkooda.

Duqa degmada waqooyiga Gaalkacyo ayaa sheegay in kaalinta ugu weyn ee dowladda hoose ka qaadato arrimaha bulshada ay tahay dhinaca amniga, inkasta oo mas'uuliyadda amniga ay tahay mid ay leedahay dowlad-gobaleedka Puntland. Sida hore loo xusay, maamulku wuxuu si joogto ah u kala dhex galaa colaadaha beelaha, kuwa oo ka dhaca gudaha degmada iyo qeybaha kale ee waqooyiga gobalka Mudug, isagoo adeegsanaya dadaallada dhexdhexaadinta iyo xallinta khilaafaadka.

Marka laga hadlayo adeegyada bulshada, duqa degmada ayaa sheegay in waxbarashada aasaasiga ah iyo adeegyada caafimaadku ay weli maamusho dowlad-gobaleedka, islamarkaana aan weli lagu wareejin maamulka degmada. Sikastaba ha ahaatee, wuxuu xusay in dowladda hoose ay taageero kooban siiso dugsiyada dadweynaha, iyadoo bixisa kharashaadka dayactirka yar-yar iyo ka qeybqaadashada adeegyada uruurinta qashinka.

Ka qeybgalayaashu sidoo kale waxa ay ka hadleen maaraynta qashinka, iyaga oo tilmaamay in dadka deegaanka ay hadda si toos ah lacag ugu bixiyaan shirkadaha gaarka loo leeyahay si ay uga qaadaan qashinka guryaha iyo ganacsiyada, taas oo caadi ahaan ka mid ah waajibaadka aasaasiga ah ee dowladda hoose. Hase yeeshee, waqtigan la joogo, doorka maamulka degmada wuxuu inta badan ku kooban yahay bixinta rukhsadaha shirkadaha qaada qashinka, halkii uu si toos ah u bixin lahaa adeeggaas.

## Nalalka Waddooyinka iyo Uruurinta Qashinka

Ka qeybgalayaashu waxay si gaar ah uga walaacsanaayeen tayada liidata ee adeegyada nalalka waddooyinka iyo qaadista qashinka, iyagoo sheegay in labada adeeg ay yihiin dhibaatooyin muddo soo jiray oo aanay weli si ku filan uga howlgelin dowladda hoose.

Dhanka iftiiminta waddooyinka, ka qeybgalayaashu waxay tilmaameen in waddooyin badan aysan lahayn wax nalal ah ama ay ku tiirsan yihiin nalalka ku shaqeeya tamarta qorraxda oo aan hadda shaqaynayn. Sida ay sheegeen ka qeybgalayaashu, inta badan nidaamyada iftiinka qorraxda waxay muddo dheer ahaayeen kuwo aan shaqeyn, taas oo ay sabab u tahay xatooyada batariyada ku jira qalabka nalalka cadceedda ku shaqeeya.

Ka qeybgalayaashu waxay ku boorriyeen maamulka degmada inuu arrintan ka dhigto mudnaan degdeg ah, iyagoo sheegay in adeegga nalalka waddooyinka oo liita uu saameyn taban ku leeyahay badbaadada iyo amniga dadweynaha, kuwaas oo maamulka laftiisu ku tilmaamay mid ka mid ah meelaha ugu muhiimsan ee mudnaanta la siinayo.

Duqa degmada wuxuu sheegay dhibaatada jirta, wuxuuna ka qeybgalayaasha ku wargeliyey in mashruuc cusub ee uu maalgelinayo Bangiga Adduunku dhawaan laga hirgelin doono Waqooyiga Gaalkacyo iyo degmooyinka kale. Sida uu sheegay, mashruucu wuxuu ku saabsan yahay rakibidda nalal casri ah oo ku shaqeeya tamarta qorraxda, kuwaas oo gacan ka geysan doona hagaajinta iftiiminta degmada.

Adeegga uruurinta qashinka wuxuu ahaa arrin kale oo si weyn looga hadlay. Ka qeybgalayaashu waxay dhaliileen shirkadaha qaabilsan qaadista qashinka, iyagoo sheegay in isticmaalka gaadiidka aan daboolnayn uu sababo in qashinka, gaar ahaan bacaha iyo walxaha fudud, ay ku daataan waddooyinka inta lagu guda jiro qaadista, taas oo kordhinaysa wasakhowga deegaanka kana hor imaanaysa dadaallada lagu ilaalinayo nadaafadda magaalada.

Isagoo ka jawaabaya cabashooyinkan, duqa magaalada wuxuu tilmaamay in maamulka degmada uu ruqsad siiyey hal shirkad oo keliya oo qaabilsan uruurinta qashinka guryaha iyo goobaha ganacsiga, iyadoo adeeggaas lagu bixiyo lacag bille ah oo ah 5 doolar. Hase yeeshee, wuxuu qiray in maamulka degmada uusan weli si buuxda u gudan mas'uuliyadda ka saaran nidaaminta, hagidda iyo kormeerka adeegyada maareynta qashinka.

Inkastoo duqa degmada uu qeyb weyn oo dhibaatada ka mid ah ku tilmaamay waxqabadka aan wanaagsanayn ee shirkadda ruqsadda loo siiyey adeegga, haddana wuxuu aqoonsaday baahida loo qabo in maamulka degmada uu xoojiyo kormeerka iyo fulinta heshiiska si loo xaqiijiyo in adeegyada la bixiyo ay waafaqsan yihiin heerarka loo dejiyey.

Duqa magaalada wuxuu sidoo kale dhaliilay qaar ka mid ah bulshada deggan xaafadaha, kuwaas oo qashinka ku daadiya luuqyada iyo marinnada gudaha xaafadaha, halkii ay ku ridi lahaayeen goobaha loo asteeyey uruurinta qashinka ee ku yaalla bannaanka guryahooda, si ay shirkadda adeegga haysata ruqsaddu u qaaddo.

## Caqabadaha Hortaagan Dowladda Hoose

Duqa degmada ayaa tilmaamay dhowr caqabadood oo xaddidaya awoodda dowladda hoose ay ku gudan karto waajibaadkeeda, marka laga soo tago dakhliga oo kooban iyo maqnaanshaha kabka maaliyadeed ee ka yimaada dowlad-gobaleedka Puntland. Caqabadahaas waxaa ka mid ah colaadaha soo noqnoqda ee beelaha, kaabayaasha waddooyinka oo aan ku filnayn, biyaha roobka ee wadooyinka fadhiista, iyo fulin la'aanta go'aannada dowladda hoose.

1. Colaadaha Beelaha: Duqa degmada wuxuu ku tilmaamay colaadaha soo noqnoqda ee beelaha mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee ay wajaheyso degmada. Wuxuu sharaxay in dowladda hoose ay marar badan ku lug yeelato wax-ka-qabashada colaadahaas, iyadoo fududeysa dhexdhexaadinta, isu keenidda odayaasha dhaqanka, iyo taageerista dadaallada dib-u-heshiisiinta. Inkastoo tallaabooyinkaas ay inta badan gacan ka geystaan yareynta xiisadaha degdegga ah, haddana waxay inta badan yihiin kuwo ka daba tag ah oo aan wax ka qaban sababaha asaasiga ah ee colaadaha.

Sida uu sheegay duqa degmada, colaadaha soo noqnoqda ee beelaha waxay degmada u saameeyaan dhowr dhinac. Waxay carqaladeeyaan uruurinta dakhliga, waxaa ku baxa qeyb weyn oo ka mid ah miisaaniyadda yar ee dowladda hoose, waxayna ka niyad jebiyaan xirfadlayaasha aqoonta leh inay ka shaqeeyaan degmada sababo la xiriira amnigooda. Wuxuu sidoo kale xusay in wax ka qabashada hal colaad ay mararka qaar ku mashquulin karto masuuliyiinta dowladda hoose toddobaadyo, taas oo ka leexineysa waajibaadyada maamulka ee muhiimka ah islamarkaana dib u dhigta bixinta adeegyada.

2. Kaabayaasha Waddooyinka oo Liita: Ka qeybgalayaashu sidoo kale waxay muujiyeen walaac ku saabsan xaaladda liidata ee waddooyinka guud ahaan degmada, iyagoo tilmaamay in burburka kaabayaasha dhaqaalaha uu yahay caqabad weyn oo hortaagan isu-socodka dadka iyo horumarinta dhaqdhaqaaqyada dhaqaale ee degmada.

Duqa degmada ayaa dhibaatadan ku sababeeyay labo arrimood oo waaweyn: Dhismayaasha guryaha iyo kuwa ganacsiga ee soo galay waddooyinka dadweynaha, iyo dib-u-habeyn iyo dhisid yarida kaabayaasha waddooyinka. Wuxuu ku dooday in adkeynta fulinta xeerarka qorsheynta magaalooyinka, oo ay ku jirto in la burburiyo dhismayaasha laga sameeyay hareeraha waddooyinka, ay gacan ka geysan doonto furidda waddooyinka xiran iyo hagaajinta isu-socodka gaadiidka.

3. Biyo-fadhiisiga Roobka: Biyo-fadhiisiga roobka ayaa ahaa qodob kale oo aad looga dooday intii ay socotay dooda dadweyne. Ka qeybgalayaashu waxay xuseen in xitaa roob yar uu sababi karo in waddooyinka biyo fadhiistaan muddo dheer, taasoo carqaladeysa isu-socodka dadka lugaynaya iyo gaadiidka, islamarkaana dhibaato iyo caqabad weyn ku ah isku socodka dadka degmada.

Isagoo ka jawaabaya arrintan, Duqa degmada ayaa sheegay in nooca carrada deegaanka ay leeyahay awood nuugis biyo oo hooseysa, taasoo sabab u ah in biyaha roobka ay muddo dheer ku sii nagaadaan goobaha ay ku uruuraan. Inkastoo xaaladda carradu ay qeyb ka tahay sababaha keena biyo-fadhiisiga, haddana ka qeybgalayaashu waxay carrabka ku adkeeyeen in yaraanta ama maqnaanshaha kaabayaasha biyo-mareennada ay tahay arrin muhiim ah oo sii xoojinaysa dhibaatada. Sidaas darteed, waxay tilmaameen baahida loo qabo faragelin dowladeed oo lagu horumarinayo nidaamyada biyo-mareennada iyo maareynta biyaha roobka.

Arrintani waxay noqotay walaac joogto ah oo ay qabaan dadka degmada, kuwaas oo marar badan codsiyo iyo cabashooyin u gudbiyay hay'adaha ay khusayso si wax looga qabto dhibaatada. Sikastaba ha ahaatee, tani waxa ay muujinaysa in aan weli la helin xal waara oo lagu maareeyo dhibaatadan.

4. Xaddidnaanta u Hoggaansanaanta Bulshada ee Awoodda Maamulka Dowladda Hoose: Duqa degmada ayaa sidoo kale muujiyay walaac ku saabsan heerka hoose ee u hoggaansanaanta qaar ka mid ah dadka deegaanka ee ku aaddan awoodda iyo awaamiirta maamulka dowladda hoose. Wuxuu tilmaamay in mararka qaar xiriirrada iyo ku tiirsanaanta qabiilka ay caqabad ku noqdaan hirgelinta xeerarka iyo nidaamyada maamulka degmada, maadaama qaar ka mid ah shakhsiyaadka ay adeegsan karaan qabiilka si ay uga hor yimaadaan go'aannada maamul ee la gaaro.

Sida uu sheegay Duqa magaalada, kala-qeybsanaantan waxa ay wiiqaysaa ma aha kaliya awoodda iyo haybadda maamulka dowladda hoose, balse sidoo kale waxay saameyn taban ku yeelanaysaa hannaanka guud ee dowladnimada iyo isku-duubnida bulshada. Sidaas darteed, wuxuu ugu baaqay dadka degmada inay mudnaan dheeraad ah siiyaan mas'uuliyadda muwaadinnimo iyo wada-shaqeynta hay'adaha dowladda, halkii ay ku tiirsanaan lahaayeen isku-xirnaan ku salaysan heybta qabiilka.

## Mudnaanta Dowladaha Hoose ee 2026

Dhammaadkii doodda dadweyne, ka qeybgalayaashu waxay duqa magaalada ka codsadeen inuu faahfaahiyo mudnaanta iyo qorshayaasha ugu muhiimsan ee maamulka dowladda hoose ee sanadka 2026. Duqu wuxuu qiray inuusan xilligaas haynin qorshaha horumarineed ee dhammeystiran, balse wuxuu soo bandhigay dhowr arrimood oo muhiim ah oo hadda hagaya howlaha iyo jihada maamulka.

Mudnaantaas waxaa ka mid ah:

- Hagaajinta nadaafadda guud ee degmada;
- Kala saarista Bajaajta, iyadoo loo kala qeybinayo A iyo B;
- Dib-u-furista waddooyinka xiran;

- Bilaabidda barnaamijka beerista geedaha; iyo
- Wax-ka-qabashada caqabadaha la xiriira nalalka waddooyinka ee degmada.

Marka la eego mudnaantaas, duqa magaalada ayaa sheegay in maamulka uu horumarka ugu badan ka sameeyay nidaaminta howlaha Bajaajta. Iyadoo qeyb ka ah dadaallada ballaaran ee lagu xoojinayo amniga, maamulka dowladda hoose ayaa bilaabay diiwaangelinta gaadiidka, wuxuuna Bajaajta ka shaqeeya dhinaca Galkacyo ee ay maamusho Puntland u kala saaray labo qeybood, oo loo kala asteeyay calaamado rinji ah oo si muuqata loo garan karo.

Sida uu sheegay duqa magaalada, howlgalkan diiwaangelintu waxaa lagu ogaaday ku dhowaad 900 oo gaadiid oo laga diiwaangeliyay laguna canshuuray dhinaca Galkacyo ee ay maamusho Galmudug, balse si joogto ah uga shaqeyn jiray labada dhinac ee magaalada. Wuxuu ku eedeeyay in qaar ka mid ah gaadiidkaas ay ku lug lahaayeen dhacdooyin amni daro oo ka dhacay labada dhinac ee Galkacyo.

Maamulka ayaa ku dooday in nidaamka kala-soocidda Bajaajta uu ka qeyb qaatay yareynta dhacdooyinka amni ee la xiriira gaadiidka, islamarkaana uu kordhiyay dakhliga ka soo xarooda canshuurta wada marista gaadiidka.

Sikastaba ha ahaatee, hindisahan ayaa dhaliyay aragtiyo kala duwan oo ka dhex jira dadka degmada. Wadayaasha Bajaajta ayaa ka cabanayay in nidaamka cusub uu hoos u dhigay dakhligooda maalinlaha ah, maadaama uu xaddiday awooddooda ay si xor ah uga shaqeyn karaan labada dhinac ee magaalada.

Sidoo kale, qaar ka mid ah dadka degmada ayaa dhaliilay tallaabadan, iyagoo sheegay inay isu-socodka ka dhigtay mid adag, maadaama rakaabka looga baahan yahay inay raacaan labo Bajaaj oo kala duwan marka ay ka gudbayaan labada dhinac ee Gaalkacyo ee ay kala maamulaan Puntland iyo Galmudug. Qaar ka mid ah ka qeybgalayaashu sidoo kale waxa ay u arkeen siyaasaddan inay sii xoojinayso kala-qaybsanaantii taariikhiga ahayd ee magaalada, inkastoo tan iyo sanadkii 2017 ay jireen horumarro la xiriira isu-socodka iyo is-dhexgalka labada dhinac.

Duqa magaalada ayaa diiday aragtidaas, isagoo ku adkaystay in kala-soocidda Bajaajtu ay tahay tallaabo maamul iyo mid amni oo keliya, ayna ahayn arrin siyaasadeed. Wuxuu sidoo kale sheegay in maamulka Puntland uu kala shaqeeyay hirgelinta nidaamkan dhiggiisa maamulka Galmudug, islamarkaana uu sheegay in dhinaca Galmudug uu taageersan yahay habkan.

## Gunaanad

Doodda dadweyne waxay noqatay madal muhiim ah oo u fududeeysay muwaadiniinta iyo maamulka dowladda hoose inay si wax-ku-ool ah uga wada hadlaan arrimaha muhiimka ah ee maamulka iyo dowlad-wanaagga ee quseeya Waqooyiga Galkacyo. Doodda ayaa diiradda lagu saaray arrimo ay ka mid yihiin uruurinta dakhliga gudaha, kharashaadka guud ee dowladda, bixinta adeegyada dadweynaha, diyaarinta miisaaniyadda, ka-qeybgalka muwaadiniinta, iyo xiriirka ballaaran ee ka dhexeeya maamulka dowladda hoose iyo bulshada degmada.

Ka qeybgalayaashu waxay sidoo kale iftiimiyeen caqabadaha joogtada ah ee la xiriira biyo-fadhiisiga roobka, tayada liidata ee nalalka waddooyinka, iyo maaraynta qashinka. Waxay ugu baaqeen maamulka dowladda hoose inuu arrimahan si gaar ah mudnaan uga siiyo qorshayaashа iyo ajandaha adeeg-bixinta bulshada. Dhankiisa, Duqa degmada ayaa faahfaahiyay caqabadaha dhinacyada maaliyadda, culeyska amni iyo karaanka xaddidan ee awoodda maamulka si looga jawaabo baahiyaha iyo filashooyinka muwaadiniinta.

## Talooyin Tixgelin Mudan

1. **Hagaajinta Hufnaanta Maamulka Maaliyadda:** Maamulka dowladda hoose ee Waqooyiga Galkacyo waa inuu daabacaa xogaha muhiimka ah ee la xiriira maaliyadda, oo ay ku jiraan miisaaniyadaha sanadlaha ah, waxqabadka dakhliga, warbixinnada kharashaadka, xogta la xiriirta qandaraasyada iyo iibka, iyo warbixinnada maaliyadeed ee dhammaadka sanadka. Helitaanka dukumentiyadan waxa ay xoojineysaa hufnaanta maamulka, waxa ayna siineeysaa muwaadiniinta fursad ay kula socdaan sida loo maareeyo lacagaha laga uruuriyo, taasoo kor u qaadi lahayd isla-xisaabtanka. Sidoo kale, in muwaadiniintu helaan xogta maaliyadeed waxay kordhin kartaa rabitaanka muwaadiniinta ee bixinta canshuuraha, maadaama ay arki karaan sida loo adeegsado dakhliga gudaha ee laga soo uruuriyo bulshada.
2. **Diyaarinta Hannaan Joogto ah ee Ka-qeybgalka Muwaadiniinta:** Maamulka dowladda hoose waa inuu sameeyaa hannaan joogto ah oo nidaamsan oo loogu talagalay wada-hadallada iyo is-dhexgalka muwaadiniinta, kaas oo ka baxsan barnaamijyada ku salaysan mashaariic gaar ah ama kuwa ay taageeraan deeq-bixiyeyaasha. Kulamadan iyo madallada wada-tashiga ah waxay siinayaan dadka deegaanka fursad ay ku soo bandhigaan cabashooyinkooda iyo baahidooda, uga qaybqaataan habraacyada qorsheynta iyo diyaarinta miisaaniyadda degmada, islamarkaana ay ku helaan xog ku saabsan mudnaanta iyo waxqabadka maamulka. Dhisidda nidaam joogto ah oo noocan ah waxay xoojin lahayd kalsoonida ka dhexeysa bulshada iyo maamulka, waxay hagaajin lahayd isgaarsiinta labada dhinac, waxayna kor u qaadi lahayd dowladnimo ku salaysan ka-qaybgalka muwaadiniinta.
3. **Xoojinta Hufnaanta iyo Isla-xisaabtanka Nidaamka Iibka Dowladda Hoose:** Maamulka dowladda hoose waa inuu hubiyaa in habraacyada iibka ay noqdaan kuwo hufan, tartan ku salaysan, islamarkaana ay heli karaan dhammaan shirkadaha iyo adeeg-bixiyeyaasha buuxiya shuruudaha looga baahan yahay. Ku dhawaaqidda furan ee qandaraasyada iyo adeegsiga habraacyo cad oo caddaalad ah oo lagu xusho qandaraaslayaasha waxay sare u qaadi lahayd waxtarka isticmaalka dhaqaalaha dadweynaha, waxayna xoojin lahayd kalsoonida bulshada ee go'aannada la xiriira iibka iyo qandaraasyada. Sidoo kale, xoojinta maamulka ee qandaraasyada iyo nidaamyada kormeerka waxay awood u siin lahayd maamulka inuu si wax-ku-ool ah ula xisaabtamo qandaraaslayaasha, si loo hubiyo in adeegyada iyo heerarka shaqo ee lagu heshiiyay si habboon loo fuliyo.
4. **Dib-u-habeynta iyo Xoojinta Guddiyada Xaafadaha:** Maamulka dowladda hoose waa inuu dib u howlgeliyo oo uu xoojiyo guddiyada xaafadaha, kuwaas oo ay ka qeybgalayaashu tilmaameen inay inta badan noqdeen kuwo aan si firfircoon u shaqeyn. Guddiyadan waxay noqon karaan hannaan muhiim ah oo isku xira bulshada iyo maamulka dowladda hoose, iyagoo fududeynaya isgaarsiinta labada dhinac islamarkaana taageeraya abaabulka bulshada ee arrimaha ay ka mid yihiin nadaafadda, ilaalinta deegaanka, wacyigelinta dadweynaha, iyo amniga xaafadaha. Awood-siinta iyo xoojinta qaab-dhismeedkaan heer degmo waxay kor u qaadi lahayd lahaanshaha bulshada ee qorshayaasha horumarineed ee degmada, waxayna xoojin lahayd wada-shaqeynta ka dhexeysa muwaadiniinta iyo maamulka degmada.

**Somali Public Agenda**

Mogadishu Somalia

+252(0)85 8358

info@somalipublicagenda.org

<https://www.somalipublicagenda.org>

@somalipubagenda

*Warbixintan waa middii afaraad ee lagasoo saaray afar kulan dadweyne oo taxane ah oo laga sameynayo Dhuusamareeb iyo Koonfurta Galkacyo oo katirsan Galmudug, iyo Qardho iyo Waqooyiga Galkacyo oo katirsan Puntland. Kulamadan waxaa loogu talagalay in lagu xoojiyo ka qeybgalka muwaadiniinta ee dowladaha hoose waxaana taageeray National Endowment for Democracy.*